Seattle Public Schools

# 2023-24 Hagitaanka Racfaanka ee Qoysaska

Waad ku mahadsan tahay kalsoonidaada iyo iskaashigaaga guusha waxbarasho ee ardaydaada. Waaxda Waxbarashada Sare waxay ku dadaashaa inay bixiso hagitaan ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib nidaamka rafcaanka Waxbarashada Hormarsan (WAC 392-170-076) Qoysasku waxay xarayn karaan rafcaan haddii ardaygooda lagu helo inaanu u qalmin adeegyada Waxbarashada Sare. Waa inay haystaan caddaynta duruufo gaar ah ama ka maqan ujeeddooyin/madooyin ujeeddo leh oo lagu bixiyo inta lagu jiro baaritaanka caalamiga ah.

Marka rafcaan ay la socdaan dukumeenti/caddeyn (haddii uu rafcaankaagu u baahanyahay) la gudbiyo, waaxda AL ma aqbali doonto macluumaad dheeraad ah ama dukumeenti si loo tixgeliyo inta lagu jiro dib u eegista racfaanka.

**Kama dambaysta foomamka rafcaanku waa Talaadada, 20ka Febraayo**

## Bilaw

Kahor inta aadan gudbin racfaanka, fadlan waqti isa sii si aad u heshid dukumeentiyada soo socda.

- ☐ Warqadda u-qalmitaanka ardayga.
  - Warqadani/natiijadan waxaad ka heli kartaa Source account
- ☐ Macluumaad ku saabsan noocyada racfaanka la heli karo iyo waqtiyada kama dambaysta ah
  - Tan waxaad ka heli kartaa Bogga Internetka Waxbarashada Hormarsan..
- ☐ Foomka racfaanka waxaa laga heli karaa Bogga Internetka Waxbarashada Hormarsan. Iyo warqadda u-qalmitaanka ardaygaaga.
  - Ku qorn Amharic, Simplified Chinese, English, Somali, Spanish, iyo Vietnamese
- ☐ Diyaarinta sharaxaadda duruufaha gaarka ah ama maqan ujeeddada iyo /ama shuruudaha maadadda ah, iyo shaqaalaha barista taageeraya dukumiintiyada **24 saac** gudahood ka dib marka ay soo gudbiyaan foomka racfaanka.
  - Macluumaadkan waa in loo diraa advlearn2@seattleschools.org. Fadlan ku qor" Appeal" cinwaanka.

Haddii aad tarjumaan u baahantahay si aad u buuxiso foomka racfaanka, fadlan la xiriir Kooxda Daryeelka Waxbarashada Hormarsan advlearn2@seattleschools.org.

## Buuxinta Racfaanka

Qoysasku waa iney mid doortaan labada xulasho ee racfaanka: **Conditional or Identification**

Haddii racfaankaagu uusan u dhicin labadan qaybood, racfaankaaga dib looma eegi doono, waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay heli doonaan warqad ogeysiin ah oo xogtan wadata. Qoysaska qaar ayaa dareemaya in qiimaynta loo isticmaalay habsocodku aanay si sax ah u tusin in ilmahoodu u baahan yahay adeegyada Waxbarashada Sare ama ilmahoodu uuuujiyay koboc aad u wayn tan iyo markii xogta la ururiyay. Kani rafcaan sax ah maaha.

## Racfaanada Shuruudaha ku xiran (Conditional Appeal)

Xaalad ama sabab ayaa la rumaysanyahay inay keentay macluumaad qaldan ama aan la heli karin.

- Tusaalaha 1: Ardaygaygu wuu xanuunsanaa xilligii la qaadayey imtixaanka Horumarka Waxbarashada (MAP), tanna waxa lagu xaqiijiyay warqad dhakhtar iyo warqad maamule ah.
- Tusaalaha 2: iPadka ardaygayga waxa qaatay arday kale intii lagu jiray qiimaynta. Arintaas ayaa isla markiiba lagu wargeliyay macalinkii oo isaga iyo maamulaha ay xaqiijiyeen sida ay wax u dhaceen.
- Tusaalaha 3: Qalabka Waxqabadka La Soo Bandhigay (DPT) ama qiimaynta MAP looma dhammaystirin ilmahayga, kama aan bixin.

**Racfaan qaatayaashu waa iney xogta qoraal ku soo gudbiyaan:**
Sharaxaad iyo cadayn qeexeysa sababta ay u rumaysan yihiin in natiijada aqoonsiga ardaygoodu eeyan sax ahayn sababtoo ah xaalad iyo sabab gaar ah oo awgeed loogu celiyo.

## Aqoonsiga Racfaanka (Identification Appeal)

Waxaa dhacay qalad xogta ku saabsan loo isticmaalay aqoonsiga. Taas oo sababtay in dib laga ogaadey inaanu ardaygu adeegyada u qalmin.

- Tusaale: Macallinka iyo maamulaha waxay xaqiijiyaan in xogta qiimaynta si khaldan loo geliyay nidaamka..

**Rafcaan qaadayaashu waa inay soo ururiyaan oo ku soo gudbiyaan qoraal:**
Sharaxaad ay weheliso caddaymo caddaynaya inuu khalad ku jiray xogta loo adeegsaday aqoonsiga.

## Maxaa tan xiga?

Marka racfaanka la gudbiyo, Guddiga Racfaanka ee Xulashada Anshaxa Badan (MSC) ayaa kulmi doona, dib u eegis ku sameyn doona foom kasta oo rafcaan ah iyo xogta loo isticmaalo in lagu sameeyo go'aanka u-qalmitaanka asalka ah, ka dibna waxay sameeyaan go'aan rafcaan.

Guddiga Rafcaanka ee MSC waxa uu ka kooban yahay macalimiin tababaran iyo shaqaale xirfadleyaal kale sida lataliyayaal, macalimiin, iyo hoggaamiyeyaasha degmada. Guddigu waxay dib u eegaan xogta/macluumaadka ardayga lagu soo gudbiyay rafcaannada waxayna go'aamiyaan haddii racfaanku sax yahay oo uu keeno isbeddel go'aanka u-qalmitaanka.

Marka ay guddigu dhammeeyaan dib u eegista rafcaanka, waxay siin doonaan go'aan qoraal ah qoysaska 25 maalmood oo dugsi gudahooda ka dib markii ay heleen foomka rafcaanka.

Guddiga Rafcaanka ee MSC ayaa dib u eegi doona hal rafcaan arday kasta, sannadkii. Go'aanka guddiga waa kama dambays.

Iyadoo la raacayo sharciga gobolka, qof kasta oo ka cadhooday go'aanka kama dambaysta ah ee sarkaalka degmada wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Degmada King 30 maalmood gudahooda ka dib go'aanka.

Su'aalo dheeraad ah? Nagala soo xidhiidh advlearn2@seattleschools.org